THE OHIO CENTER FOR DEAFBLIND EDUCATION

Adeegyada Wax ka qabashada Hore ee

Loogu talagalay

dhalanka, socod baradka iyo caruurta yaryar, oo aan lahayn, maqalka iyo araga

Xarunta Ohio ee waxbarashada kuwa dhego iyo indhaha la' (OCDBE) waa mashruuc ee gobolada taasoo loogu talagalay iney bixiyaan caawimaad wax ku ool ah, waxbarashda meel fog laga sameeynayo, iyo isku xirka reeraha iyo shaqsiyada kuwaas oo ah dhalaadka ilaa 21 jir, kuwaasoo la' maqalka iyo araga. (oo lagu garanayo dhagoole iyo indhoole)

Maxaay macno tahay markii la dhaho dhagool iyo indhoole?

Dhagoole iyo indhoole waa heer qofku isku darsaday maqal iyo arag la'aan waxaana sababay dhicisnimo, cudur ama cilada koromosoomyada, ama xitaa sabab aan la garaneynin.

Sidee ilmaha lagu fiirin karaa si loo ogaado iney araga/maqalka la'yihiin?

Markii dhalitaanka kadib dhaladka waa la eegi karaa maqalka

Si loo ogaado haddii uu ilmahu leeyahay cilada wax maqalka. Dhakhtarka dhegaha wuu fiirin karaa maqalka ilmaha iyo caruurta yaryar

Arag beelida xirfadle wuxuu ku ogaan karaa isla markii uu ilmaha ey dhashtaan, laakiin aragu wuxuu ka mid yahay waxa kora, arag la'aanta lagu ma ogaan karo dhaladka waxey u baahantahay in la fiiriyo ee kuwa xirfadle ey baaraan ilamaha iyo caruurta yarba.

Waalidku maxaa looga baahanyahay haddii ey shakiyaan in ilmuhu ey leeyihiin cilada araga iyo maqalka?

Haddii uu waalidku ama kuwa siiya wax ka qabashada hore ey shakiyaan in dhalaanka, socod baradka ama caruurta yar yar ey leeyihiin cilada maqalka ama araga, kuwa OCDBE waxey bixiyaan kheyraad badan si ey ugu caawiyaan waalidka si ey u eegaan araga iyo maqalka ilmaha. Warka kheyraadka wuxuu waalidka kaga caawin karaa iney ogaadaan haddii uu ilmuhu u baahanyihiin baaritaanka caadiga ah ee maqalka iyo araga taasoo uu dhakhtarka ku taqsuusay waxyaalah indhaha iyo araga sameeyo.

Kheyraadka ee OCDBE , waxaana laga helaa ciwaanka (www.ohiodeafblind.com), wey caawin karaan waalidka iney eegaan araga iyo maqalka ilmaha si ey u ogaadaan haddii ey u baahanyihiin baaritaan dhkhtareed.

1. *Sawirka Go'aanka Wax ka qabashad hore.*
2. *Warqadaha rasmiga ee kugu haga wax ka qabashada hore: Aqoonsiga iyo barnaamijka qorshaha ilmaha, socod baradka iyo caruurta yaryar kuwaasoo leh cilada araga iyo maqalka.*
3. *Baaritaanka maqal la'aanta iyo curyaanimada araga.*
4. *Hagitaanka waalidka si ey u ogaadaan caruurta aan lahayn dhegaha iyo indhaha.*

Haddii ey dhalaanku, socod baradku ama caruurta yaryar ey leeyihiin cilada maqalka ama araga, maxaa kheyraad ah ayaa la helikara?

Haddii uu ilmaha ey raagaan iney ka koraan meel walba, taasoo ey araga iyo maqalku ka mid yihiin, gobol walba wuxuu leeyahay barnaamij ah igu caawi inaan koro, kaasoo eyqeybta Ohio ee caafimaadka bixiyaan. Barnaamijkaas wuxuu waalidka ka caawiyaa iney ogaadaan

baahida ilmaha dhalaanka, socod baradka iyo caruurta yaryar ah. Tixraac waa in la sameeyo barnaamijka igu caawi inaan koro iyadoo la raacaya ciwaankan https://odh.ohio.gov/know-our-programs/help-me-grow/help-me-grow

Wax ka qabashada hore ee Ohio (https://ohioearlyintervention.org), Barnaamijka gobol walba ee wax ka qabashada hore waxaa laga helaa gobol walboo Ohio, wuxuu waalidka siinayaa adegyada iskukeenida ee ilmaha dhalaanka, socod baradka iyo caruurta yaryar kuwaasoo ah curiyaan ama ey raageen iney koraan.

Adeegyadee ayaa la heli karaa markii loo maro xarunta Ohio ee waxbarashada kuwa dhagoole iyo indhoole ah?

- Xarunta Ohio ee waxbarashada kuwa dhagoole iyo indhoole ah waxey adeegyada kala duwan u bixiyaan ilmaha leh cilada maqalka iyo araga kuwaasoo lagu diiwaan geliyay Tirakoobka Ohio ee kuwa dhagoole iyo indhoole ah , adeegyadaas waxaa ka mid ah:
- Waxbarasho xirfad leh iyo fursado tababar ah.
- War ku saabsan haayada iyo kheyraadka ku xiriira araga, maqalka, iyo dhego iyo indho la'aanta ee isku xiriixta.
- War ku saabsan adeegyada waqtiyadii hore ee ilmaha,da'da iyo dugsiga, Aqoonta, Isbeddelka, Dhexgalka, iyo kuwa kaloo badan….
- Adeegyada latalinta ee waalidka, reerka, kuwa waxbaraya, adeegyada kaloo ku xiriira, iyo kuwa siiya wax ka qabashada hore
- Tirakoobka Ohio ee kuwa dhagoole iyo indhoole ah
- Kulanka waalidka
- Caawimaad oo lagu caawiyo waalidka si ey uga qeyb galaan kulanka

Waa maxay adeegyada latalinta?

Adeegyada xarunta ohio ee waxbarashada kuwa dhagoolaha iyo indhoolaha ah, kuwa ka mid ah barnaamijka caawimaadka ee wax ku ool ah, waxey bixiyaan latalinta aan lacag lagu bixineynin oo caruurta, dhaliyarada, dhaladka ilaa 3jir, caruurta dugsiga aadaan (3-21) kuwaasoo leh cilada araga iyo maqalka oona lagu diiwaangeliyay Tirakoobka Ohio ee kuwa dhagoole iyo indhoole ah. Adeegyada latalinta, waxaa lagu sameeyaa guriga ama meela lagu sameeyo wax ka qabashada hore, waxaa ka mid ah:

- Wareysiga waalidka iyo kuwa dugsiga ku xiriira
- In baaritaan dugsiga ama guriga loogu sameeyo ardeyda leh cilada araga iyo maqalka
- In la sameeyo warbixin kusaabsan latalinta baaritaanka iyo talooyinka
- Daba raacinta waalidka iyo kuwa waxbara taasoo ku saabsan sameynta talooyinka ka imaadey warbixintii latalinta.

Waa maxay Tirakoobka Ohio ee kuwa dhagoole iyo indhoole ah?

Tirakoobka Ohio ee kuwa dhagoole iyo indhoole ah, waxaa u baahnaa qeybta waxbarashada ee US, Xafiiska barnaamijka ee waxbarashada qaaska ah, waxey ka mid yihiin qaranka Ilmaha ee tirade caruurta, dhalaanka ilaa 21jir, kuwaasoo dhego iyo maqal la' (dhagoole iyo indhoole). Sanad walba OCDBE waxaa masuul ka saran iney ogaadaan caruurta iyagoo u maraya Ohio kuwaasoo aan wax maqleynin ama eysan arkeyni (oo loo ya qaano dhagoole iyo indhoole). Loo ma baahna ogeysiinta waalidka haddii ilmo la diiwangelin rabo, haddii ey kuwa waxbara ama qofka wakiil ka ah uu diiwangeliyo kuma xadgudbin FERPA , taaso lagu sheegay diiwangelinta 99.31(a)

Sidee buu waalidku ama kuwa bixiya wax ka qabashada hore ugu diiwaangeliyaan Tirakoobka Ohio ee kuwa dhagoolaha iyo indhoolaha ah ee ilmaha dhalaanka ah, socod barad ah iyo caruurta yaryar? Si aad ilmo ugu diiwaan geliso Tirakoobka Ohio ee dhagoolaha iyo indhoolaha marka hore.

Tilaabada 1aad: Ciwaankan ka gal bogga OCDBE www.ohiodeafblind.com. Meeniyuga kore ee bogga ku dhufo Meesha ku qoran Tirakoobka dhagoolaha iyo indhoolaha; kadibna ku dhufo ***Ilmo diiwaangeli*** ama ku dhufo ***Diiwaangeli/ cusbooneysii ilmaha*** ee bogga guriga.

Tilaabada 2aad: Geli magaca ilmaha ee ugu dambeeyo ama taariiqda dhalashada kadibna ku dhufo ciwaanka ***Halkan ku dhufo si aad u bilawdo*** si aad warka ilmaha u geliso diiwaanka.

Tilaabada 3aad: Markaad dhameyso ku dhufo ***Dib u fiiri*** ama ***Jooji***.

Tilaabada 4aad: Markaad fiiriso diiwaanka kadib ku dhufo ***Gudbi***.

Diiwaankuna wuxuu u gudbaa OCDBE si ey u fiiriyaan. Haddii uu ilmuhu xaq u leeyahay waxaa looga diiwangelinayaa Tirakoobka Ohio ee kuwa dhagoolaha iyo indhoolaha.

War dheeraadka ah ee ku saabsan Xarunta Ohio ee waxbarashada kuwa dhagoolaha iyo indhoolaha ah iyo sida la isku diiwaangeliyo Tirakoobka Ohio ee kuwa dhagoolaha iyo indhoolaha ah, nagala soo xiriir halkan www.ohiodeafblind.com.